

# SOOMAALIYA

## XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

# 2017

ICRC waxay Soomaaliya ku leedahay taariikh dheer oo soo jirtay muddo 35 sano oo ah ka jawaab celinta colaada iyo gargaarka bani'aadamnimada ah. Hawlahaan waxaa ka mid ahaa booqashooyinka maxaabiista intii lagu guda jiray dagaalkii Ogaadeen iyo Itoobiya (1977-1978) iyo sidoo kale hawlgalo gargaar ballaaran oo deg deg ah intii lagu jiray dagaalkii sokeeye ee dheeraa iyo macluushii la xiriirtay cimilada ee horraantii 1990-meeyadii. ICRC waxay sii wadi doontaa caawinta dadka dhibaataada ka soo gaartay isku darka khilaafaadka hubaysan oo sii dheeraaday iyo dhibaatooyinka cimilada adag sida abaaraha iyo daadadka.

Gaar ahaan xaaladdii dhacday sanadkii 2017-kii halkaas oo abaarta ba'aara y saameysay nta badan dalka oo ka dhalatay dhibaato bani'aadamnimoo ballaaran. U gurka Bisha Cas ee Soomaaliyeed

## IN KA BADAN 2,500,000 QOF AYAA LA CAAWIYEEY

(SRCS) sababo u dhowaanshaheeda bulshada daraadeed kaalin weyn ayey ka qaadata barnaamijyada qaarkood sida adeegyada taageerada daryeelka caafimaadka iyo dib-u- soo celinta xiriirka qoysaska kala maqan.

Bilowgii hore abaarta Soomaaliya, ICRC waxay caawisay in ka badan 2.3 milyan oo qof 1.3 milyan oo dadakaas ka mid ah waxay ku caawisay maaliyad, cunto, waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qoyska iyo daaweynta xoolaha. In ka badan 480,000 qof ayaa heley gargaar caafimaad iyo in ka badan 700,000 qof ay helay biyo nadiid ah iyo nadaafad wanaagsan. Kooxaha xabsiyada waxay booqashooyin ku bixiyeen 43 meelood oo xabsiyo ah.

Si isku mar ah, ICRC waxay fulisay barnaamijyadan soo socda:



### HORUMARINTA SUGNAANTA DHAQAALAHA

Waxaan xaqiijinaa in qoysaska iyo bulshooyinka ku sugan Soomaaliya sidii ay u dabooli lahaayeen kharajyada aan awoodi karin ayna sii joogteeyaan hab-nololeed waara



**624,376**

Waxaa cunto deg deg ah iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qoyska loo qaybiyey ilaa 624,376 qof



**581,634**

Iyadoo loo maraayo gargaarka lacagta caddaanka ah, shaqo lacag ku bedelasho, iyo deeq lacageedba waxaa kaalmo dhanka dhaqaalaha ah la siiyay 581,634 qof



**344,412**

Iyadoo loo maraayo daaweynta xoolaha, xakameynta diqsigu gendiga, tababarada caafimaadka xoolaha iyo bixinta xirmooyin ay ku jiraan qalabka caafimaadka xoolaha ayaa 344,412 qof lagu taageray xannaanada xoolaha



**5,700**

Iyadoo loo maraayo tababaro iyo bixinta xirmooyin ku ay jiraan qalabka kalluumaysiga ayaa 5,700 qof loo horumariyey kalluumaysiga



**222,150**

Si kor loogu qaado wax soo saarka cuntada waxaa abuur (shinni), qalab iyo matoorada waraabinta la gaarsiyey ilaa 222,150 qof



**247,410**

Waxaa la taageeray hawalaha loorar ciid lagu shubay loogu xoojinaayo jiinka webiyada waxaana ka faa'ideystay 247,410 qof



## TAAGEERADA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Hadafka hawlaheena caafimaadka waa in dadka ay saameysay colaada ay helaan daryeelka caafimaadka asaasiga ah ee ka hortagga iyo daaweynta kaas oo waafaqsan heerarka caalami ahaan la aqoonsanyahay. Waxaanu ku caawinaa ama si ku meel gaar ah u bedelnaa adeegyada caafimaadka maxalliga ee Soomaaliya

**H 71,000**

Waxaa la taageeray 4 isbitaal kuwaas oo qaabilay in ka badan 71,000 qof oo ay ku jiraan in ka badan 3,800 oo xaalado dhaawaca hubka ah



**410,837**

Sahay caafimaad oo tayo leh ayaa la gaarsiiyey 10 isbitaal iyo 29-ka bukaan-socod- eegtooyinka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) oo ka faa'ideystay in ka badan 78,00 bukaan ee heer isbitaal iyo 410,837 qof ee daryeelka caafimaadka asaasiga ah



**85,400**

Labada xarumood ee xanaanada deg degga oo ay taageerto ICRC waxay la tacaaleen 85,400 xaaladood oo nafaqo-xumo ah oo ay ku jiraan in ka badan 5,000 caruur oo da'dooda ka hooseyso shan sano oo nafaqo-xumo ba'an iyo dhibaatooyin caafimaad kale qabay



**+ 13,000**

Waxaa helitaanka daryeelka caafimaadka loo hagaajiyey 5 meelood oo xabsiyo ah ayna ka faa'ideysteen dad kor u dhaafaya 13,000 oo la talinta koowaad ah iyo waxaa la daweeyey in ka badan 1,200 maxaabiis oo qabay nafaqo-xumo daran iyo mid dhexdhexaad ah





## BOOQASHADA MAXAABIISTA IYO DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Dadaaladayada dhowrida waxaa loogu talagalay in ay ka faa'ideystaan kuwa xabsiga loo taxaabo oo la xabiso, gaar ahaan qaabka khilaafka hubaysan iyo sidoo kale dadka rayidka ah oo aan ka qayb qaadaneyn ama aan ka qayb qaadan doonin dagaalka. Intaa waxaa dheer, khilaafaadka iyo musiibooyinka waxay kala geeyaan qoysaska taas oo horseedo sanado badan oo hubanti la'aan ah ee qaddarka ku dhacay qaraabada. Iyadoo ay weheliso Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxaan meel ku sheegna dadka, waxay isdhaafsadaan farriimo, waxaan dib u mideyna qoysaska una caddeyno qaddarka dadka maqan.



**5,600**

Munaasadda bisha barakeysan ee Ramadaan awgeed waxaa raashin iyo waxyaabaha aan cuntada aheyn oo ay ku jiraan hilib, caano, sokor iyo timir la gaarsiyey 5,600 maxaabiis, sidoo kale sanadka oo dhan waxaa la gaarsiyey walxaha nadaafadda loo isticmaalo iyo mararka qaarkood gogosha iyo agabka waxbarashada/madadaalada.



**2,732**

Si loo qiimeeyo xaaladda nololeed ee 2,732 maxaabiis wa xaa la sameeyey 43 booqasho si loo xaqiijiyo in loola dhaqmo si bani'aadamnimo ah oo ay la jirto sharaf



**1,172**

Sanadka oo dhan ICRC waxay diyaarisay 1,172 codsiyo baafin ah. Iyadoo taageero laga heley SRCS waxaa la fududeeyey 49,367 wicitaano telefoon iyo waxaa la isweydaarsaday 71,313 oo ah Farriimaha Laanqayrta Cas (RCM) si ay ula xiriiraan dadkii ay jeclaayeen oo kala maqan



**7,812**

Adeegyada baafinta oo loo fidiyo bulshooyinka ku nool Soomaaliya oo dhan ayaa sidoo kale taageera BBC-da laanta Afka Soomaaliga iyadoo u mareysa barnaamij ka baxo raadiyaha ayaa si joogto ah looga sii daaya magacyada dadka maqan. Wadar ahaan magacyo gaaraya 7,812 ayaa la baahiyey

## DHIIRIGELINTA U HOGGAANSANAANTA XEERKA CAALAMIGA EE BANI'AAD-AMNIMADA (IHL)

Anagoo ah urur aan eexan, dhexdhexaad ah oo madaxbannaan, iyadoo horumarineysa xoojineysa xeerka caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) iyo mabaadida caalamiga ee bani'aadamnimada waxaan ku dadaalnaa in aan ka hortagno dhibaataada.



**1,400**

1,056 oo saraakiil ciidan iyo in ka badan 1,400 hoggaamiyeyaal bulsho, suxufiyiin, haween, dhallinyaro iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ayaa lagu wacyi-geliyey Xeerka Caalamiga ee Bani'aadamnimada (IHL) iyadoo loo qabtay kulamo waxbarasho iyo qaybinta qoraalada warbaahineed ee ICRC oo ah heerka hab-dhaqanka colaada hubaysan





## HAGAAJINTA ADEEGYADA BIYAHA & NADAAFADDA

Waxaan dib-u -soo celinaa adeegyada muhiimka ah ee biyaha iyo u xaqijinta bulshooyinka ay saameysay colaadaha hubaysan xaalado nololeed oo wanaagsan. Tani waxay ku lug laheyd horumarinta kaabayaasha biyaha dadweynaha ee isbitaalada iyo xabsiyada iyo bixinta biyo, adeegyada nadaafadda iyo korontada- ugu dambeyntiina badbaadinta nolol iyo ka hortagga dhibaataada.

 **295,000**

Mashaariic Soomaaliya lagu dhammeystiray waxaa lagu dayactiray 50 ceel iyo 34 ceel-gacmeedyo kuwaas oo helitaanka biyo nadiif ah u hagaajiyey ku dhowaad 295,000 qof

 **526,000**

Ololaha kor u qaadida fayodhowrka oo lagu dhiirigeliinaayo dhaqamada wanaagsan ee fayodhowrka ayaa ka faa'ideystay dad kor u dhaafaya 526,000 oo ka faa'iideystayaal ah

 **225,000**

In ka badan 225,000 qof ayaa ka faa'ideystay 40 mashaariic oo lagu qabto biyaha roobka

 **2,000**

Waxaa la dayactiray kaabayaasha biyaha oo ka faa'ideystay ilaa 2,000 qof oo ku jira xabsiyada

 **49,000**

Waxaa la qabtay hawlaha xakameynta cayayaanka cudurka faafiya iyo waxaa la dhiirigelyey barnaamijyada fayodhowrka kuwaas oo ka faa'ideystay ilaa 49,000 qof oo ku jira xabsiyada

# ICRC

